

# WAXBARASHADA

*Waa Daaqadda rejada iyo  
Fursad dhismaha Mustaqbalka Agoonta*





05



MASHAARIICDA  
BIYAHA IYO  
FAYADHOWRKA



06



ADEEGYADA IYO  
HAWLAHA SAMAFAL  
EE CAAFIMAADKA



08



MASHAARIICDA  
DHISMAHA



10



MASHAARIICDA  
XOOGSI XALAAL AH



12



MASHAARIICDA



13



HAWLAHA  
WAXBARASHADA



مسارات  
خيرية CHARITABLE  
PATHS



جمعية الرحمة العالمية  
Rahma International Society

Address: Barbera Road - Hargeisa  
Mobile: +252633278253  
Phone: +252514333  
E-Mail: somalia.office1@gmail.com  
Website: www.arcsom.org

WAA DHANBAAL BILLE AH OO  
HAYADDA GARGAARKA AFRICA  
(A.R.C) AY KAGA WARRANTO  
MASHAARIICDEEDA HORUMARINEED  
IYO BANI-AADAMNIMO .

TIRSIGA (29) JAN 2024





## WASIIR CALI XOORXOOR IYO MAAYER MOOGE OO BOOQASHO KU YIMID HIH



Wasiirka Shaqo-galinta, Arrimaha Bulshada iyo Qoyska JSL Mudane Eng. Cali Cumar Maxamed iyo duqa caasimadda mudane Cabdikariim Axmed Mooge, ayaa u kuurgalay adeegyada caafimaad ee cisbitaalka caalamiga ah ee Hargeysa (HIH), iyo habsami u socodka adeegyada uu bulshada u hayo oo ay ka mid tahay tababarka waayoaragnimo ee hawlwadeenanda caafimaadka ee dalka.

Waftiga ayaa soo indha-indheeyey dhammaan qaybaha kala duwan ee cisbitaalka, warbixinana ka dhegeystay masuuliyiinta qaybahaas ka hawlgasha iyo guud ahaan maamulka cisbitaalka. Iyaga oo dhankoodana soojeediyey

talooyinka iyo Tilmaamaha ay u arkaan in ay ka qaybqaadan karaan sii wanaajinta adeegyada cisbitaalka iyo xidhiidhka cisbitaalku la leeyahay bulshada.

Labada masuul waxaa xarunta cisbitaalka ku soo dhoweeyey Dr. Cabdriixmaan Almucalimi, guddoomiyaha guud ee hay'adda A.R.C ee uu cisbitaalku hoos tago iyo Dr. Axmed Muctamad, agaasimaha cisbitaalka HIH. Dr. Mucallimi ayaa masuuliyiinta uga mahadnaqay booqashadooda, waxa aanu bogaadiyey dadaalka ay iska saarayaan u xogogaal noqoshada goobaha bixiya adeegyada bulshada.



## MAALINTA SHAQAALAHA ARC: MUNAASABAD FARXADEED KULMISA DHAMMAAN HAWLWADEENANDA



Waxaa xarunta Kuweytiga ka qabsoomay, munaasabad farxadeed ay isugu yimaaddeen dhammaan hawlwaadeennada kala duwan ee hay'adda gargaarka Afrika – ARC. Ciyaaro, maadays, khudbado wacyigelineed iyo kulamo isbarasho oo shaqaalaha dhexdooda ah, aya munaasabadda ay ku soo bandhigeen hawlwaadeennada waxaayaha kala duwan iyo Barnaamijyada hay'adda ARC.

Masuuliyiinta ka hadlay waxaa ka mid ahaa maamulaha guud ee ARC, Dr. Cabdiraxmaan Almucallimi iyo maamule ku xigeenka ahna madaxa mashaariicda farsamada gacanta mudane Xuseen Mutawalli. Labada masuul waxa ay ka

hadleen waxtarka munaasabaddan iyo kaalinta uu iskaashiga iyo xidhiidhka wanaagsani ku leeyahay wanaagga iyo horumarka shaqada. Waxa aanay dhiirrigeliyeen muhiimada ay leedahay in shaqaaluhu ay noqdaan cudud midaysan.

'Maalinta shaqaalaha ARC' waa munaasabad ay sannad kasta curashadiisa isugu yimaaddaan maamulka, shaqaalaha iyo guud ahaan hawlwaadeennada qaybaha kala duwan ee ARC. Waxa aanay ujeeddadeedu tahay isbarashada, xoojinta xidhiidhka wanaagsan iyo iskaashiga, is xog Waraysiga maamulka iyo shaqaalaha, iyo in ay noqoto maalin damaashaad iyo maadays ay shaqaaluhu isugu yimaaddaan



# MASHAARIICDA BIYAHA IYO FAYADHOWRKA



## ARC OO HIRGELISAY CEELAL BIYOOD OO CUSUB

Hay'adda Gargaarka Afrika (ARC) ayaa mar kale ku guulaysatay in ay ceelal biyood u qoddo qaybo ka mid ah bulshada ku dhaqan deegaannada oomanaha ah ama biyaha yar ee Soomaaliya.

Barnaamijka samafal ee biyaha ee ARC ayaa saddex ceel ka hirgeliyey deegaanno ku yaalla duleedka magaalooyinka Jowhar ee Hirshabeelle iyo Kismaayo, Jubaland.

saddexdan Ceel ayaa mid kasta uu jooggiisu dhan yahay 15x1.2 Mitir, waxaana

loo sameeyey dabool iyo qolfoof sabbad ah iyo dararka ay xooluhu ka cabbayaan. saddexdan ceel ayaa wadartoodu ay awood u leeyihiin in uu daboolo baahiyaha biyood ee ugu yaraan 150 qoys.

ARC oo gacan ka helaya hay'adda caalamiga ah ee ALRAXMA Kuweyt, waxa ay sannad kasta tobannaan ceel ka qoddaa deegaannada Soomaalida ee ay ku adag yihiin gaadhitaanka biyaha nadiifta ahi, gaar ahaan xilliyada abaaraha.



## ADEEGYADA IYO HAWLAHA SAMAFAL EE CAAFIMAADKA



### ARC OO HARGEYSA KA FULISAY QALLIINKA XIDHISTA FARUURTA OO BILAASH AH

Hay'adda Gargaarka Afrika (ARC) ayaa mar kale magaalada Hargeysa ka fulisay qalliinka qurxinta faruurta oo lacag la'aan ah. Dhakhaatiir takhasus ah oo ka socda cisbitaalka caalamiga ah ee Hargeysa, ayaa ku guulaystay qalliinka ay faruuryaha ugu xidhayeen toban carruur oo ka soo jeedda qoysaska danyarta ah ee magaalada Hargeysa.

Sannad kasta boqollaal carruura Soomaaliyeed ah ayaa ka faa'idaysta qalliinka faruuryaha oo ay ARC ka fuliso,

deegaannada kala duwan ee Soomaalida gobalka Geeska Afrika. Mashruucan waxaa maalgelisa hay'adda caalamiga ah ee ALRAXMA oo xarunteedu tahay dalka Kuweyt.

Cisbitaalka Caalamiga ah ee Hargeysa (HIH) waxa uu ka mid yahay mashaariicda caafimaadka ee ay ARC ka fuliso gobalka Geeska Afrika. Dhakhaatiirta takhasuska ah ee cisbitaalka ayaa si joogto ah uga qaybqaata hawlaha samafalka caafimaadka la xidhiidha ee ARC ay fuliso.





## ARDAY AGOON AH AYAA LOO QAYBIYEEY MURAAYADAHAA ARAGGA

Hay'adda ARC ayaa Muraayadaha aragga Kaaba oo bilaash ah u qaybisay 10 ka mid ah ardayda agoonta ah ee lagu daryeelo xarunta Kuweytiga ee magaalada Hargeysa.

Mashruuca 'la dagaalanka indha la'aanta' oo ay fuliso ARC ayaa Muraayadaha aragga ugu deeqay ardaydan, kaddib markii lagu sameeyey baadhitaanno lagu sameeyey xaaladda caafimaad ee araggooda

iyo lana hubiyey baahida ay u qabaan Muraayadaha iyo cabbirkooda.

Xarunta Kuweytiga ee magaalada Hargeysa oo wax lagu baro, isla markaana hoy u ah carruurta agoonta ah oo lagu daryeelo waxa ay ka mid tahay mashaariicda ay gacanta ku hayso hay'adda Gargaarka Afrika oo gacan kaalmo ka helaysa hay'adda caalamiga ah ee ALRAXMA Kuweyt.



## MASHAARIICDA DHISMAHA



## HAWSHA DHAMMAYSTIRKA XARUNTA AMAL EE BOORAMA OO MEEL FIICAN Maraysa



Waxaa weli si firfircoon u socda hawsha dhammaystirka dhismaha, xarunta caafimaadka ee AMAL oo ka socda Boorama. Waa Mashruuc ay dedejintiisu muhiim tahay, marka la eego baahida daran ee bulshadu ay u qabto adeegyo caafimaad oo casri ah.

Magaalada Boorama ee xarunta gobalka Awdal, waxa ay ka mid tahay deegaannada ay ARC muddada dheer ka wadday, adeegyada caafimaad iyo mashaariic kale oo waxbarasho iyo guud ahaan arrimaha



samafalka la xidhiidha.

Mashruucan waxaa caawinaysa hay'adda caalamiga ah ee ALRAXMA Kuweyt, waxa aanu qayb ka yahay barnaamijka samafalka caafimaadka ee ARC oo ka socda deegaanno kala duwan oo Geeska Afrika ah.

ARC waxa ay hore xarumo caafimaad iyo cisbitaallo uga dhistay, kana shaqaysiisaa deegaanno kala duwan oo ka mid ah dhulka Soomaalida ee gobalka Geeska Afrika.



## HAWLAHA DHISMAHA CISBITAALKA HIH OO MEEL FIICAN MARAYA



Waxaa meel fiican maraya hawlaha dhismaha cusub ee cisbitaalka caalamiga ah ee Hargeysa (HIH). Dhismaha cisbitaalka waxaa maalgelinaya Sanduuqa Awqaafta ee dawladda Kuweyt oo soo mariyey hay'adda caalamiga ah ee ALRAXMA, Kuweyt.

Cisbitaalka HIH oo ka mid ah cisbitaallada ugu qalabka casrisan gobalku waxa uu ka kooban yahay 12 takhasus oo ay ka hawlgalaan dhakhaatiir isugu jira muwaadiniin iyo ajaanib aqoonsare iyo waayoaragnimo fog u leh qaybaha ay ka hawlgalaan.

Cisbitaalka cusub oo hawshan dhismihiisu si xawli ah u socoto, waxaa loo dhisayaa si casri ah oo waafaqsan halbeegyada caalamiga ah ee cisbitaalka, waxa aanu noqon doonaa xarunta rasmiga ah ee cisbitaalka HIH oo ka mid ah mashaariicda caafimaadka ee ay hay'adda ARC ka fuliso gobalka Geeska Afrika. Waxa aanu ku shaqeeyaa siyaasad waafaqsan 'Yoolka caalamiga ah ee horumarka waara' oo ah 'In adeegyada caafimaadku ay noqdaan lacag' si dakhliga ka soo baxaa uu qayb ahaan u bixiyo kharashka cisbitaalka.



## MASHAARIICDA ARRIMAHA BULSHADA




## Lo' Dhaqasho Ah Oo La Guddoonsiiyey Qoys Xooluhu Ka Baxeen

Mashruuca 'Xoogsi xalaal ah' ayaa qoys danyar ah guddoonsiiyey sac irmaan iyo neefkiisii. Si ay uga faa'idaystaan caanaha, subagga iyo taranta dambe ee neefafkan. Qoyskan xooluhu ka baxeen oo ku nool duleedka magaalada Baladweyne ee dawlad gobaleedka Hirshabeelle, waxa ay ka mid yihiin boqollaal qoys oo sannad kasta ka faa'idaysta mashruucan xoolaha dhaqashada ah lagu gaadhsiiyayo dadka danyarta ah ee ay ka baxaan xoolaha ay lahaan jireen.

Waxaa maalgelisa hay'adda caalamiga ah ee ALRAXMA Kuweyt, waxa aanay ujeedadiisu tahay in il dakhli soosaar loo abuuro, si loo yareeyo ku tiirsanaanta kaalmada dibadda.

Mashaariicda Xoogsi xalaal ah oo ku dhisan siyaasad waafaqsan Yoolka caalamiga ah ee 'Horumar Waara' waxa kale oo ka mid ah maalgelinta ganacsiyo yaryar, iyo tababarro xirfadaha kala duwan ah oo wiilasha iyo gabdhaha la siiyo si ay ugu shaqaystaan.





# WAXBARASHADA

## *Waa Daaqadda rejada iyo Fursad dhismaha Mustaqbalka Agoonta*

Hay'adda Gargaarka Afrika waxa ay garawsantahay muhiimadda ay mudantahay waxbarashada oo ah dariiq midho dhal ah oo lagu wanaajin karo nolosha agoonta, looguna suurtagelin karo in ay mustaqbal fiican dhistaan.

Fahamkaas ARC ee ah in waxbarashadu ay kaalin muhiim ah u leedahay gobalka Geeska Afrika, waxa uu sabab u noqday in Barnaamijka waxbarashada ay ka dhigto udub dhexaadka hawlahaada bani'aadamnimo.

Waxbarashadu waa furaha lagu gaadhi karo madaxbannaani iyo isku filnaanshiyo qofeed, gaar ahaan agoonta oo laga yaabo in caqabado dheeraad ahi saaran yihiin. Barnaamijka waxbarashada ee ARC, waxa uu xoogga saaraa in ardaygu uu helo jawi

waxbarashada ku habboon, waxa aanu xoojiyaa sidii loo gaadhi lahaa horumar dhammaystiran, iyo in ardayda lagu jiheeyo dhabbaha guusha noloshodu ku jiri karto.

Mashaariicda waxbarashada ee ARC oo isugu jira waxbarashada akademiga ah iyo Barashada farsamada gacanta iyo xirfadaha nolosha, waa fursad lagu wanaajinayo heerka waxbarasho ee ardayga agoonka ah, lagana caawinaya in uu helo xirfadaha muhiimka u ah waajahista caqabadaha maalinlaha ah ee nolosha iyo kuwa mustaqbalka iman kara. Waxbarashada waa dheer in ilmaha lagu tababaro horumarinta nafta oo ay ugu horreyso galaangalka iyo dhexgalka bulshada, taas oo ka qaybqaadanaysa in la dhiso shakhsiyad xooggan, isla markaana xilkas ah.

## WAXBARASHADA



## Shandadaha Dugsiyada Oo Loo Qaybiyey Arday Agoon Ah



ARC ayaa shandadaha ardayda buuggaagta ku qaataan u qaybisay 100 ka mid ah ardayda agoonta ee lagu hayo xarunta Kuweytiga ee magaalada Hargeysa. Waxa kale oo shandadaha la socday kaabayaasha ardayga, iyo agabka muhiimka u ah waxbarashada ee ay ka mid yihiin buuggaagta, qalimaanta iwm.

Mashruucan oo hal-ku-dheggiisu ahaa "Agoon maad daryeeli" waxa uu qayb ka yahay Barnaamijka daryeelka nololaha agoonta iyo waxbarashadooda. Waxa aanu yoolkiisu yahay in agoonta lagu dhiirrigeliyo sii wadista waxbarashada

iyo in lagu abuuro dareenka muhiimadda iyo sarraynta waxbarashada. iyo in lagu abuuro xiisaha iyo jacaylka waxbarashada si looga ilaaliyo niyadjab ku keena in waxbarashada ay ka dhacaan.

Hay'adda caalamiga ah ee ALRAXMA Kuweyt ayaa maalgelisa mashaariicda daryeelka agoonta ee ay ARC ka waddo Somaliland, iyo guud ahaan dhulka Soomaalida ee gobalka Geeska Afrika. Yoolka guud ee ARC waa in la dhiso qofka, si mustaqbalka loo helo jil dhisn, waxbartay, isla markaana wacyigiisu dhisanyahay.



## HAWLAHA WAXBARASHADA



## ARDAYDA XARUNTA KUWEYTIGA OO XUSAY MAALINTA CAALAMIGA AH EE WAXBARASHADA



Ardayda dugsiyada kala duwan ee xarunta Kuweytiga, ayaa xusay maalinta caalamiga ah ee waxbarashada. Munaasabad ay ka soo qaybgaleen macallimiinta, maamulka dugsiyada, waalidiinta, masuuliyiin ka socda maamulka waxbarashada ee hay'adda ARC iyo tiro ka mid ah hormuudka bulshada ayaa ay ardaydu ku soo bandhigeen barnaamijyo isugu jira khudbado iyo maaweelo ay ku xusayaan maalintan.

Macallimiinta iyo martida kale ee munaasabadda joogtay ayaa iyaguna ardayda u jeediyey hadallo isugu jira waano ku aaddan muhiimadda waxbarashada iyo bogaadin ay uga jeedinayeen munaasabaddan.

Qaramada Midoobey ayaa maalinta 24 ka bisha Jeenaweri u aqoonsan, maalin caalamiya oo u gaar ah waxbarashada iyo muujinta kaalinta muhiimka ah ee ay ku leedahay bulshada iyo sida oo kale gaadhista yoolka horumarka waar.

Waxbarashadu waa dariiqa ugu saxan ee lagu gaadhi karo dhismaha bulsho udub dhexaadkeedu yahay cadaalad iyo horumar. Waa maalgashiga mustaqbalka bulshada, waxa ay abuurtaa xirfado iyo aqoonta uu qofku u baahan yahay si uu noloshiisa u wanaajiyo, yoolasha uu ka leeyahay noloshana u gaadho. Waxa ay sida oo kale abuurtaa bulshooyin xasiloon iyo dhaqaale xooggan.

Malaayiin carruur da' kala duwan ah ayaa adduunkanaannasiibuhelinwaxbarashada aasaasiga ah, ama duruufaha ku xeerani aanay u suurtagelin in ay dhammaystaan nidaamka waxbarashada.

ARC oo gacan ka hessa hay'adda caalamiga ah ee ALRAXMA Kuweyt, waa hay'adda Barnaamijyada waxbarasho ee ugu waaweyn ka wadda deegaanno kala duwan oo ka mid ah dhulka Soomaalida ee gobalka Geeska Afrika, xarumaha waxbarashada ee Kuweytiguna waxa ay ka mid yihiin mashaariicdaas samafal ee waxbarashada.



## BILOWGA WAXBARASHADA NISKA DAMBE EE SANNAD-DUGSIYEEEDKA 2023/2024



Dhammaan dugsiyada iyo xarumaha waxbarashada Kuweytiga ee Somaliland waxaa u bilowday niska dambe ee sannad-dugsiyeeedka 2023/2024, kaddib markii ay ardaydu ka soo noqdeen fasaxii yaraa. Taas oo waafaqsan nidaamka waxbarashada ee Somaliland.

Maamulka, macallimiinta dugsiyada kala duwan, iyo masuuliyiinta ARC ee waxbarashada ayaa siwadajir ah uga qaybqaatay diyaarinta dugsiyada iyo dib u bilaabashada waxbarashada oo sannadkan hal-ku-dheg looga dhigay 'Maanta waxbar, Berri hoggaamiye noqo'.

Munaasabado kooban oo ardayda lagu soo dhoweynayey ayaa ka qabsoontay xarumaha dugsiyada, maamulka, macallimiinta iyo masuuliyiinta




waxbarashada ee ARC ayaa ardayda u jeediyeey hadallo isugu jira, soodhoweyn, dhiirrigelin iyo dardaaran la xidhiidha dadaalka uu uga baahanyahay geeddi waxbarashadu.

Boqollaal arday ayaa sannad kasta ka faa'idaysta barnaamijka waxbarashada ee ARC oo maamula, xarumo iyo dugsiyo waxbarasho oo ku yaalla guud ahaan deegaannada kala duwan ee Soomaalidu ku leedahay gobalka Geeska Afrika. waxaa ka mid ah xarumaha Kuweytiga ee Hargeysa, xarunta Al-Nuur ee Boorama, Xarunta Alxannaan ee Burco, Xarunta Garoowe ee Al-Amal, iyo xarunta Almustaqbal ee Laascaanood, iyo dugsiyo kala duwan oo ku yaalla Soomaaliya iyo dalwad deegaanka Soomaalida.







## إنجازات (A.R.C) لعام 2023م WAXQABADKA A.R.C EE SANNADKA 2023



230,686



221,640



51%

49%





@africanreliefco



**Address:** Barbera Road - Hargisa

**Mobile:** +252633278253

**Phone:** +252514333

**E-Mail:** somalia office1@gmail.com

**Website:** www.arcsom.org

